Erayga iyo Maanta Somtwt 0258

CARRUURTA

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **CARRUURTA.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib, haatanse aynu dhegaysnno qasiiddadan.

SONG: MASIIXII DEEQDA BADNAAYO

Waxaa jira arrimo badanaa dadku ay jecel yihiin inay ka fogaadaan, welibana innaga masiixiyiinta ah, Waana inaan isla qaadaa dhignaa bal inaan aragno bal haddii aynu xamili karno xaaladahaasi. Mid ka mid ah waxyaalaha waalidiinta ay ka welwelaan, oo qalbigooda ku taagan waxay tahay haddii mid ka mid ah caruurtooda Ilaah oofsado, oo ay hortood dhintaan.

Tani waxay u eg tahay arrin ka hor imanaya tubta rajada waalidka. Waxaan garanayaa dad badan oo inaga mid ah in masiibadani ay qabsatay, waxaanan ka hadlaynaa xasaasiyadda mawduucani leeyahay maanta, waxaanan u qaadaa dhigi doonnaa si daacadnimo ah waayo waxaannu ka hadlaynaa arrin kuseeya nolosha xagga ruuxa iyo dhimashada ruux aadami ah.

Waxaan u baahan nahay markaa inaan ogaanno inay munaasab tahay in la helo hanaanka badbaadada caruurta, waana tan qof waliba oo waalid ah uu maanka ku hayo. Waxaan soo xiganaynaa haddaba kitaabka Ayuub cutubka 1aad.

Macluumaad badan ayaa ku qoran kitaabka Ayuub oo ku saabsan masiibada, dhowrka cutub ee ugu

horreeya. Habase yeeshee, waxaan diiradda saarayaa maaddada ku saabsan u yeerista Ilaah u yeeray caruurtii Ayuub inay dunida ka soo tagaan. Waxaa ku qoran kitaabkii Ayub 1:2 in Ayuub uu lahaa toddoba wiil iyo saddex gabdhood. Aayadda 4aadna waxay leedahay wiilashii waxay xaflado ku samaysan jireen guryahooda.

Waxayna casumi jireen saddexda gabdhood oo la dhalatay inay wada cunteeyaan oo wax wada cabbaan. Marka ay xalfladdu soo dhammaato ayaa Ayuub soo bixi jiray subax hore oo wuxuu bixin jiray qurbaan uu u bixinayo ilmihiisa isagoo ka cabsanaya inay Ilaah xagga qalbiga ka caayeen ama wax xun ka sheegeen. Mid kasta qurbaan buu u bixin jiray, isagoo ay la ahayd in ilmihiisu sida abbaarta ah qalbigooda Ilaah wax xun kaga sheegeen.

Taasina waxay ahayd caado joogta ah oo uu lahaa Ayuub. Waxaan halkan ku arkaynaa Aabbe ruux ahaan iyo damiir ahaanba taxaddar badan, oo doonaya in ilmihiisu u nabdoonaadaan. Markii ay bilaabatay haddaba tijaabadii Ayuub, waxay ahayd mid daran, waxaase ugu darnaa tii ugu dambaysay ee ku dhacday isaga sida ku qoran kitaabka Ayuub 1:18-19, waxaana qoran sidatan:

“Oo weli intii kaasu sii hadlayay ayuu mid kale yimid, oo wuxuu yidhi, Wiilashaadii iyo gabdhahaagii waxay wax ku cunayeen oo khamri ku cabbayeen gurigii walaalkooda ugu weynaa. oo bal eeg, waxaa cidlada ka timid dabayl weyn, oo gurigii afartiisa rukun bay ku dhufatay, kolkaasuu ku dumay raggii dhallinyarada ahaa, oo dhammaantood way dhinteen, oo anigoo keliya ayaa ka soo baxsaday inaan warka kuu keeno ama kuu sheego.”

Waxaa laynoo sheegay in Ayuub eedaynin Ilaah; inaanu dacwad u qabsan, ama uusan Ayuub

Ilaah u qaadin caro iyo cadowtinimo dhacdada naxdinta leh ee qabsatay aawadeed. Taasina waa arrin muhiim ah oo ay tahay inaan wax ka baranno sida loola tacaalo ama tacaamulo murugada ka timaadda markii qof qoyska ka mid ah dhinto, khaasatan haddii uu yahay qofkaasi ilmahaaga. Lagana yaabo inaan aragno mid ama dhowr carruur ah inay inaga dhintaan.

Waxaan xusuustaa shil gaari oo ka dhacay magaalada Milwaukee, oo ah caasimadda aan deganahay, sannado badan ka hor markaasoo qoyska wadaad caan ah oo watay fatuurad yar ay ku yimaadeen alaab gaari weyn ka dhacday, waxaana ku dhintay ilmihiisii oo dhan, hal mid maahane. Waana masiibo weyn in intaas oo ilmo ah ay qaddar daqiiqado gudahood ah ku dhintaan.

Qaarkeen ayaa markaa laga yaabaa inay u soo joogeen ama looga sheekeeyey dad masiibadaas oo kale qabsatay; khaasaan qisooyinka murugada leh ee dad da’ yar ah ay ku dhintaan, oo ah wax aan loo baahanayn ama la filayn. Waa hagaage waxaan yara taabanay xanuunka ay masiibooyinkaas oo kale lahaan karaan, haatanna bal aynu ka yara daqaqanno arrimaha ruux ahaaneed ee taasi ledahay iyo sida aynu innaguna si macquul ah ugu diyaargaroobayno.

Miyaad weligaa isku diyaarisay dhimashada mid ka mid ah ilmahaaga? Laga yaabo in qaarkiin aad isku diyaariseen, laakiinse waxaad u baahan tahay inaad isugu diyaariso si kutalagal ah, ee aan ahayn hab kala daadsan. Isla sida aad isugu diyaariso markii aad guryo dhisanayso, waxaad ugu diyaargarowdaa si kutalagal kal ah, oo aan ahayn hab kala daadsan.

Waxaad u baahan tahay naqshad, iyo inaad baaritaan ku samayso habka ugu wanaagsan, iyo inaad maalgaliso dhismaha. Isla sidaa oo kale u diyaari ilmaha garashada Ciise Masiix si ay u

badbaadaan oo u helaan hubaasha ah inay tegayaan jannada. Haddii aad doonayso taas, xitaa haddii baaba’ weyni yimaado, qaad talaabooyin aad ku hubinayso in ilmuhu bartaan Ciise. Waxaan ku talin lahaa inaad maal gashato rumaysadka ilmaha laakiinse aadan eegin oo keliya farxadda iyo madadaalada ilmaha oo keliya.

Waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya kharashaadka la geliyo aayatiinka ilmaha ee iimaankooda iyo kan lagu bixiyo madadaalada iyo farxaddooda. Waalidiin badan ayaa aad u jecel farxadgelinta ilmaha, waxaana ay siiyaan wakhti si ay u mashquuliyaan ilmaha oo waxay ku dadaalaan in ilmuhu ay wax bartaan iyo inay ka qayb qaataan ciyaaraha, waana aragti wacan, waalidkuna way ku saxsan yihiin.

Waa xaqiiqo taasu dhib keeni mayso, ilaa ay hor joogsato koritaankooda ruuxa mooyaane, oo ay hawlahaasu qaataan ama faragaliyaan aasaaska dabiicadaha ruux ahaaneed mooyaane. Waxaan u malaynayaa in waalidiin badan ay ka ilduufeen in hawlaha abaabinta iyo tababrka ay keenaan kiniisadda amase goobaha masiixiinta, oo waxay yaraystaan in ilmahooda dhowr iyo toban jirka ah ay ku koraan kuna dhiirrogeliyaan oo ku abaabiyaan hawlaha kiniisadda markay yar yihiin ilaa ay ka baaluqaan.

Waalidiin badan sidaas ma yeelaan, laakiinse axay hormariyaan danaha iyo waxa ilmuhu ay jecel yihiin, taas ayaana go’aan u ah marka ay ilmuhu korayaan, taasina khatarteeda ayey leedahay. Laba dhibaato ayaa ka imanaysa, midina waa in waalidku isku yiraahdo waxani waa ilmahaaga ee wakhti iyo dadaal geli sidii aad ugu horumarin lahayeen waxa uu rabo, waxaanad xoogga saaraysaa damacaaga iyo ilmahaaga intii aad xoogga saari lahayd Ilaah.

Khatrta kale oo ay umuurtani leedahay waxaa weeye dabiicadihii xagga ruuxa iyo inay Sayidka ku koraan in layska indhatiro sannado badan. Lagumana gaaro dhismaha dabiicadaha damiirka qofka in la lug-dambeediyo, ama dib loo dhigo. Natiijadu waxay noqonaysaa in ilmahaagu dib u dhac ku yimaado haddii ay kula tahay inaad wakhtiga noloshooda geliso hawlo ka baxsan kiniisadda.
Haddaad wax abuurayso oo doonayso inaad hesho miro badan waa in lagaa helaa tabaabushaheeda. Maahan inaad ilmaha keento Baabtiis ama makhuuris marka uu yar yahay, dabadeedna aadan wax kale u samayn, amaanay ka qaybgelin adeeg kaniisadeedka ama hawlaha ka socda si ay xog xogaal ugu noqdaan hawlaha ruux ahaaneed. Taasina waxay la mid tahay adigoo beer soo abuuray, oo haddana cagaarka ka ag-baxaya aadan ka jarin, oo aadan bacriminin oo aadan dhuugga iyo xasharkaadka ka ilaalinin, maxaad beertaas ka helaysaa? Waxaad guranaysaa miro xadidan, oo aan qaab lahayn meeshii aad ka sugaysay beer-gurasho wacan.
Sidaasi oo kale, haddii ay kula tahay in cunugaagu uu helayo aasaaska ku habboon ee ruux ahaaneed iyo saldhigga damiirka hagaagsan ee noloshiisa, oo haddana aadan dadaal gelinin sidii taa loo daabbagelin lahaa, waxaad arki doontaa in natiijada ilmaha ay ku soo dhammaato si ka duwan sidii aad filaysay. Markay joogto aragtiyada ay dunida ka aaminsan yihiin, sidii la rabay noqon mayso, wax walibana sidii aad ugu talagashay noqon maayaan.
Waxaad u baahan tahay inaad ogaato inay masuuliyad waalidnimo kaa saaran tahay inaad kharash u hurto aasaaska ruux ahaaneed ee ilmaha, waana inaad ilmaha u noqoto hoggaan ay ku dayan karaan. Waxaa lagaa dhowrayaa inaad qof

cibaado leh tahay, akhriya qorniinka, una duceeya ilmaha, si ugu dambaynta ay arrimahaas kaaga daydaan. Waxa kale ee aan u baahan nahay waa inaan ilmaheenna kala hadalno, iyadoo aan la qarinaynin, waxyaalaha ku saabsan dhimashada. Guryaha masiixiyiinta maahan meelo gudcur ah iyo rajo la'aani ka jirto. Maahan inaan ku noolaanno goobo aan farxad lahayn iyo guri ba'ay. Waxaan leenahay guryo farxad iyo deganaanba leh. Waxaa ilmaha muhiim u ah inay leeyihiin hooyo iyo aabbe iyo in lala xiriiro iyaga si uu ku arko waxa jacayl yahay si welibana uu ugu koro nabad. Taasina waa barako weyn oo aan siin karno dhasheenna. Laakiin, maahan inaan ka dheeraanno inaan kala hadalno maaddooyinka caloolxumada leh sida shilalka caruuro dhintay, ama kuwo u dhimanaya kansarka ku dhaca unugyada difaaca jirka qofka.

Mar kasta ilmaha waa in loo sheegaa arrimahaas oo kale. Ugu dambayn waa inaynaan ka cabsan inaan ilmaha kala hadalno xaalkaas isaga ah waayo waxaan garanaynaa in Ciise Masiix dartii ay dhimashadu inoo tahay ilin laga galo Nolosha Daa'imka ah. Waxaanan jirkeenna dembiga leh uga tegaynaa dunida marka laynoo diyaarinayo inaan noqonno caruurtii Ilaah nolosha tan ka dambaysa ee jannada.

Taasina waa sheeyga ay tahay inaan kala hadalno ilmaha intii ay yar yihiin. Waana inay bartaan inay jirto dhimasho iyo halligaad dunidan, noloshooda dunidana ay leedahay dhammaad iyo bilow, oo aanay jirin xaqiiqada dhacdooyinka soo fool leh in la gaarayo iyo in kale. Taasina cabsigelin iyo argaggax u keeni mayso ilmaha, waxayse baraysaa xaqiiqda, oo waalidkuna waa inay xaqaa'iqaa baraan carruurtooda. Haddaynaan sidaas wax u barin, dunida ayaa macallin u noqonays iyaga. Wiilkayga wuxuu ka qalin jabiyey

dugsi sare oo ay leeyihiin masiixiyiinta. Dabadeedna wuxuu bilaabay jaamacad calmaani ah ama secular ah. Wuxuu halkaa kala kulmay kala duwanaansho aad iyo aad u weyn markii uu is barbardhigay nolosha masiixinnimada iyo nolosha jaamacaddaas iyada ah. Waxaanse Ilaah ku ammaanayaa inaan inankeenna wax soo barnay, oo aan u sheegnay inuu iimaanka ku adkaado, oo uu digtoonaado, waayo dunida calmaaniga ah si sahlan bay kuugu ilowsiin karaan Ilaah. Jaamacadaas oo kalena maahan mid u wanaagsan ardayda ka yimaada guryaha masiixyiinta. Wiilkaygiina wuxuu ku socday ama ku dhex joogay jaamacadda xoogga rumaysadkiisa Ilaah siiyey si uu u sii wato inuu ku koro rumaysadka Ilaah siiyey isaga.

Maaddaama aan nahay waalid xaq bay noogu leeyihiin ilmaha inaan waxbarno oo toos ugala hadalno waxyaabaha khuseeya nolosha sida dhimashada iyo inay ku dheganaadaan rumaysadkooda marka ay joogaan xerooyinka ama deegaanada calmaaniga. Haddii Ilaah yiraahdo, lumin mayno ilmaheenna, oo nagana hor dhiman maayaan. Waxase khatarta ah waxaa weeyaan haddii ay dunidu hesho oo ay horteen dhintaan. Taas Ilaah ha inaga hayo inay inagu dhacdo! Markaasina, u diyaari ilmahaaga nolosha iyo dhimashadaba, oo ha ogaadeen jacaylkaaga iyo kan Ilaah si ay ku xasiloonaadaan wax kastoo yimaadaba ama marxalad kasoo ay ku jiraanba.

SONG: MASIIXII DEEQDA BADNAAYO

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad

noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna www.twr360.org. Farriinta waxaad ka soo hor-marinaysaa Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.